Minnesota Department of **Human Services**

Foomka Arjiga Midaysan

Ka dalbo internetka laga galayo www.applymn.dhs.mn.gov

Arjigaan waxaa loo isticmaali karaa si lagu dalbado mid kasta oo ka mid ah barnaamijyadaan:

Supplemental Nutrition Assistance Program – SNAP (Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeradka)

SNAP waxa ay ku caawinaysaa dadka dakhliga hoosee deggnayaasha Minnesota in ay helaan cuntada nafaqada fiican iyo isku dheellitira. Haddii aad tahay 60 jir ama aad ka weyntahay iyo aad dalbansayso SNAP kaliya, fadlan waxa aad isticmaashaa "Supplemental Nutrition Assistance Program ah (SNAP) Arjiga Waayeelka Quseeya" ("Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP) Application for Seniors") (DHS-5223F).

Barnaamijyada kaalmada lacag caddaan ah

Barnaamijyada kaalmada lacag caddaan ah waxaa loogu talgalay qoysaska iyo shakhsiyaadka si ay ku helaan baahidooda aasaasiga illaa inta ay iyaga iskood isku bixin karaan. Barnaamijyada kaalmada lacag caddaan ah waxaa ka mid ah:

- Diversionary Work Program - DWP (Barnaamijyada Shaqada ee Weecsan)
- Emergency Assistance - EA* (Gargaarka Degdegga)
- General Assistance - GA (Gargaargka Guud)
- Group Residential Housing - GRH (Guryaha Xubnaha ee Leh iyo Cunto)
- Minnesota Family Investment Program - MFIP (Barnaamijka Maalgelinta Qoyska Minnesota)
- Minnesota Supplemental Aid - MSA (Barnaamijka Gargaarka Dheeraadka ee Minnesota)
- Refugee Cash Assistance - RCA (Gargaarka Lacagta Qaxootiga).

Haddii aad u bahaantahay in lagaa caawiyo kharashka daryeelka caruurta ku baxaya, hawlwadeenkaaga weydiiso sida **Child Care Assistance Program (Barnaamijka Gargaarka Daryeelka Caruurta)** loo dalbanayo.

Ma dooneysaa in aad caymiska Daryeelka Caafimaadka dalbatid?

MNsure kaga dalbo caymis lacagla'aan ah ama qiima jaban, Minnsesota internetkeeda suuqa caymiska caafimaadka. Ka gal www.mnsure.org ama wac 1-855-366-7873.

Sida arjigaan loo buuxinayo

Macluumaadka arjigaan ku wada jira oo idil aqriso. Noo sheeg haddii aad dooneyso in lagugu caawiyo buuxinta arjigaan. Buuxi oo u gudub bogagga 1-10 sida ugu dhaqsiyo badan ugu dir hay'addaada. Waxa aannu ku qaban karnaa taariikhda arjigaaga la qabtay haddii aannu haysanno magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga (bogga 2), laakiin waxaa shardi ah in aannu helno arjiga oo dhammeystiran si aannu go'aan uga gaarno haddii lagu caawin karo.

Si arjigaaga uu ahaado mid dhammeystiran, waxaa shardi ah in aad su'aalaha oo idil ka wada jawaabto iyo macluumaadka qaarkod la caddeeyo. SNAP iyo barnaamijyada kaalmada lacagt caddaanka ah waxaa shardi in wareysi hawlwadeenka lala yeesho. Waxa SNAP quseeya, tan waxa ay noqon kartaa waraysi telefoon.

Haddii aad ka baqaato ballanka wareysigaaga, waa shardi in aad ballan kale qabsato. Haddii aadan ballan kale qabsan, waxaa dhici karta in aannu nacfigaaga joojinno ama oggolaan weyno.

Waxaa dhici karta in aad la imaato caddaymaha macluumaadka warbixintaada ee arjigaan. Hawlwadeenkaaga waxaa dhici karta in uu caddaymo dheeraad ah ku weydiiyo. Waxaa dhici karta in aadan caawimaad helin illaa iyo inta aannu caddeymaha maclumaadkaan helayno. U soo qaado maclumaadka lagaa rabo halka u wareysiga ka dhacayo ama waxa aad maclumaadka sida ugu dhaqsiyo badan ugu dirtaa hawlwadeenka.

Dib u shahaadaynta

So wada sheeg isbadllada ka dhacay arjigaan 12kii bilood ee la soo dhaafay. Waxaa dhici karta in loo baahdo caddaynta macluumaadka la bixiyay.

Macluumaadka Layska Rabo	Barnaamijyada Lacagta Caddanka	SNAP
Arjiga kaarka aqoonsiga ama wakiilknimada rasmiga (darewalka shatigiisa, kaarka IDga gobolka, baasaboorka, iwm.)	✓	✓
Lambarrada Social Security ee dadka idil ee caawimaadda dalbanaya	✓	✓
Warqadahaa Aqoonsiga Minnesota (kaarka IDga gobolka, heshiiska kirada, iwm.)	✓	✓
Dakhliga** (jeegga mushaarka, lacagta hawlgabka, iwm.) ama lacagta kasta ee qoyskaaga soo gala (shaqala'aanta, dakhliga kafalaqaadaha, iwm.). Hay'adda waxa ay hubsan doontaa dakhliga Social Security.	✓	✓
Kharashka guriyeynta*** (rasiidka bixinyada kirada/guriga, rahanta, heeshiska kirada, iwm.)	✓	✓
Kharashka caafimaadka*** (qaansheegtooyinka daawada la qoray iyo caafimaadka, iwm.)		✓
Cilaaqaadka lala leeyahay xubnaha qoyska (shahaadoyinka dhalashada, warqadaha guurka, warqadaha maxkamadda, iwm.)	✓	
Koontada jeegga iyo kaydka (qoraalbixineedka bangiga, iwm.)	✓	
Qiimaha gaadiidka (gawaarida, gawaarida waa-weyn, mootooyinka, doonaha, iwm.)	✓	
Qiimaha dhabta ah ee maalgalinta shirkadda/dammaanadaha, Shahaadada dibaajiga, caymiska nafta, lacag damaana oo qof loo hayo (qaraar hantiyeed, iwm.)	✓	
Kharashyada tamarta (warqadda qoralka tamarta, qaansheegtada telefoonka, iwm.)	✓	
Caddaynta jirro ama naafonimo (warqadda qoraalka dhakhtarka, iwm.)	✓	

* Kahor inta aan Gargaarka Degdegga la dalban, kala xariir hay'addaada waxa ku taxluqa helitaanka dhaqaalaha iyo sifooyinka u qalmidda u qaas ah.

** Rasiidyada mushaarka laga bilaabo 30kii cisho ee u dambeeyay haddii aad shaqaysid ama xogta canshuurta federaalka haddii aad iskaa u shaqaysato.

*** Nacfiyadaada SNAP waxaa dhici karta in ay kordhaan haddii aad la timaaddo caddaynta kharashyadaan: masruufka caruurta ee ku baxay caruur aan kula deggenayn; kharashka guryaha; kharashyada caafimaadka (ay ku jiraan dawooyinka lagu soo qoray) ee dadka naafonimada qaba quseeya ama jira 60 sano ama ka weyn. Nacfiyadaada DWP waxaa dhici karta in ay kordhaan haddii aad la timaado caddaynta kharshyadaada guriga iyo tamarta (biyaha, korontada iyo kuleylka).

Macluumaad Muhiim ah

Ma shardibaa in aad ka jawaabto su'aalaha aannu ku weydiinayno?

Shardi kuguma aha in aad macluumaadka gaarka ku ah bixiso. Ayadoon macluumaad la haysan, surtogal nooma noqonayso in aannu ku caawinno. Haddii aad si ulakac ah nagu siisay macluumaad qalad ah, waxaa dhici karta in baaritaan dhaco dacwad been abuur ahna lagugu qaado.

Diidmada ama isbaddallada

Gobolku waxaa dhici karta in uu kuu diido ama baddalo lacagta caddaanka ama gargaarka SNAP sababo la xariira macluumaadka aad arjiga ku bixisay. Goboalku waxa uu samayn karaa baddalaadyo ayadoo lagu siinanayo 10ka cisho ee ogaysiiska digniinta ah ee lacagta caddaanka iyo gargaarka SNAP. Gobolku waxa uu kuu soo diri doonaa ogaysiis qoraal ee aan ka dabamarin taariikhda hirgalinta baddalaadyada waxa la xariira gargaarka lacagta caddaanka ee aad qaadanayso ama aad ku qaadan lahayd nacfiyadaada SNAP.

Waxa SNAP kaliya quseeya

Xubnaha qoyska kula deggan (household members) waxa ay dooran in aysan wax dalban. Inta uu yahay nacfiyada SNAP waxa ay ku xiranaan doontaa tirada xubnaha dadka ee dalbanaya. Lambarka Social Security iyo muwaddinimada ama su'aalaha socdaalka uma baahna in ay buuxiyaan kuwa aan waxba dalbanayn. Xubnaha qoyska ee wax dalbanaya waa in ay macluumaadkaan bixiyaan. Xubanaha qoyska ee aan waxba dalbanayn waxaa shardi ku ah in ay bixiyaan macluumadka dakhligooda iyo, mararka qaarkoodna, hantidooda sabbto ah macluumaadkaan ayaa loo baahanyahay si lagu eego haddii dadka wax dalbanaya ay caawinadda heli karaan.

Barnaamijyada gargaarka ee ku-meelgaarka

GA iyo GRH waa "barnaamijyada gargaarka ee ku-meelgaarka." Taasi macnaheeda waxa ay tahay in ay ku caawinayaan inta aad nacfiyada kale dalbanayso. Si aad ku qaadato GA ama GRH waa in aad dalbato nacfiyada kale ay dhici karto in aad u qalantid, sida Social Security ama Mag-dhowga Shaqaalaha(Worker's Compensation). Haddii ay jirto in aad nacfiyo kale qaadatid isla waqtiga ee qaadanayso GA ama GRH, waxa aad dib u celin doontaa GA iyo GRH.

Lambarrada Social Security (SSN)

Barnaamijyada badankood, waxaa shardi kugu ah in keento lambarka Sooshal Sekuuradka (SSN) ee xubin kasta ee ka mid ah xubnaha qoyska ee nacfiyada dalbanaya*. Haddii aad u baahantahay lambarka SSN waxa aannu kugu caawin karnaa sida mid lagu dalbado. Gobolku waxa uu lambarkaaga SSN uu ugu isticmaalayaa:

- Si lagu xaqiijiyo aqoosinga, laga hortago ka qaybqaadashada soo noqonaya iyo isbaddallo lagu sameeyo
- Si lagu ogaado mudnaanshaha barnaamijyada sida SNAP, nacfiga lacagta caddaanka ee qoyska, iyo barnaamijka cuntada ee dugsiga
- Waxa quseeya dib u eegyada barnaamijka iyo hantidhowrka si lagu ogaado u qalmidda qoyska, ay ku jiraan baaritaannada been abuurka
- Si lagula duwo barnaamiyada kale ama hayadaha gobolka ay kugu siyaan adeegyada qiimaha iyo qaayaha ka badan leh.

Haddii aadan ahayn qof dhalashada Maraykanka haysta iyo aad dalbanayso Refugee Cash Assistance looma baahna in aad sheegto lambarka SSN.

* (Food Stamp Act of 1977 [Xeerka Gargaarka Cuntada ee 1977] sida lagu saxay PL 97-98 iyo Social Security Act of 1935 [Sharciga Sooshal Sikuuradka ee 1935] [section 1137] sida lagu saxay PL 98-369 iyo 42 CFR 435.910 [2006]; [Minn. Stat., section §256D.03, subd. 3[h]; Minn. Stat., section §256L.04, subd. 1a])

Codsadayaasha aan muwadiniinta ahayn

Si aad ku heshid cawimaadda barnaamijyada guud badankood, waa shardi in aad tahay qof Maraykanka (U.S.) sharci ku jooga. Xubnaha qoyskaaga ee aan muwadiniin ahayn iyo yihiin kuwo dalbanaya caawimaada waa in ay la yimaadaan caddaynta xaaladdooda muhaajirnimada. Ay bixiyaan nuqulka labada dhinacba ee kaarkooda muhaajirnimada ama dukumiintiyo kale ee sheegaysa xaaladda muhaajirnimada ee xubin kasta ee qoyska ka tirsan ee aan muwaddin Maraykan ahayn haddana caawimaadda dalbanaya. Waa dalban kartaa caawimaaddana waxa aad xubnaha kale ee qoyska, xitaa haddii aadan adiga wax dalabanayn ama aadan wax u qalmin sababo xaaladdaada muhaajirnimada la xariira.

Waxa xubnaha qoyskaaga aan muwaddinka ahayn quseeya ee caawimaadda dalbanaya iyo caawimaadda u qalma, hawlwadeenkaaga ayaad kombiyutarka la barbardhigaya kombiyuutarka Xafiiska Muwaadinka iyo Adeegyada Socdaalka ee Maraykanka - USCIS (U.S. Citizenship and Immigration Services) si lagu caddeyo dukumiintiyada xaaladda muhaajirnimada ee aad na siisay ay yihiin kuwa jira.

Macluumaadka adiga kugu saabsan lama wadagayno USCIS ayadoon oggolaashahaaga la haysan. Haddii aad qaadatid lacag caddaan ah waxaa dhici karta in ay saamayso baddalaadyad xaaladdaada muhaajirnimada. Haddii aad dooneyso macluumad dheerad ah ama aad jaceshahay in aad ogaatid waxa hay'adda aay oo sheegi karto ama weydin doonto USCIS, la hadal hawlwadeenkaga.

Muhaajirnimada

Macluumaadka idil ee muhaajirnamada ee aad na siiso waa mid gaar ah. Waxa aannu u isticmaali doonaa haddii aad caawimaad ku heli kartid. Waxa kaliya oo aan la wadaagi doonnaa marka uu sharciga qorayo ama farayo. Xalaadaha badankood, dalbashada saamayn kuma yeelan doonto xaaladdaada muhaajirnimada.

Looma baahna in aad na siiso xalaaddaada muhaajirnimada haddii aad tahay qof:

- Qof kale ku caawinaya dalbashada kaliya
- U dalbanaya caruurtaada ama xubnaha qoyskaaga, balse aadan nafsi ahaanta u dalbanayn.

Gacanqaadka guriga iyo dadka waaweyn ee baylahan

Dagaalka iyo xadgudubka waa waxa uu qof dhahayo ama samaynayo sii uu cabsi kuu geliyo ama uu kugu xukumo. Dadka waayeelka ah, tabar daran, naafonimada qaba, ama dad kale ku tiirsan si ay gargaarka ugu helaan waxa dhici karta in aysan awood u lahayn in ay iska difaacaan gacanqaadka ama xadgudubka guriga. Minnesota waxa ay leedahay sharci difaacaya iyo caawinaya dadka waaweyn ee baylahan ee lagu xadgudbayo ama aad awoodin in ay helaan difaaca iyo nabadgalyada ay u baahanyihiin. Sharciga ayaa caawin kara dadka waaweyn ee baylahan in ay u helaan badbaadada iyo nabadgalyada ay u baahanyihiin.

Gacanqaadka guriga

Waxii mucluumaad dheeraad ah ee gacanqaadka guriga la xariira, hawladeenkaaga weydiiso "Buug Warbixineedka Macluumadka Gacanqaadka Guriga" ("Domestic Violence Information brochure") (DHS-3477). Haddii ay dhacdo in gacanqaadka guriga uu saamayn ku yeesho raacitaanka xeerarka barnaamijka, hawlwadeenkaaga la hadal. Haddii aad halis u tahay gacanqaadka guriga, caawinana u bahaantahay, wac khadka degdegga Qarameed ee Gacanqaadka Guriga (National Domestic Violence hotline) ee laga waco 1-800-799-7233; 1-800-787-3224 (TTY) ama Isbahaysiga Dumarka Lagu Xadgudbay (Minnesota Coalition for Battered Women) at 1-800-289-6177.

Dadkda waaweyn ee baylahan

Waca Khadka Xiriirka Da'adda ee Waayeelka (Senior LinkAge Line) ee laga helo 1-800-333-2433 si aad uga warbixiso iyo ku caawisid qof weyn ee baylahan si uu ku helo badbaado iyo caawimaad.

Masuuliyadahaaga

- Waa ku qasbantahay in aad hay'adda u soo sheegto isbaddallada nacfigaaga saamayn kara muddo 10 cisho gudahood marka isbaddalka uu dhacay. **Codsadayaasha** – Isbaddalladan u soo sheega hawlwadeenkiinna marka uu isbaddalku dhaco. Tan waxaa ka mid ah waxa soo socda ee qof kasta ee qoyskaaga ah ku taxluqa:
  - Shaqada – Bilawdo ama joojiso shaqo ama meherad; isbaddallada saacadaha, mushaarka ama kharashyada ku taxluqa
  - Dakhliga – Rasiidyada ama isbaddallada ka jira masruufka caruurta, Social Security, lacagta la siiyo askartii hore, caymiska shaqala'aanta, dhaxalka, nacfiyada caymiska iyo bixinyo kale
  - Hantida – Gadashada, iska iibinta ama wareejinta guri, gaari ama sheeyo kale ee qiima leh, ama dhaxal ahaan ama heshiis ku yimid
  - Xubnaha qoyska – Marka uu qof dhinto ama uu naafoobo, ka guuro ama dib ugu soo laabta guriga ama si ku-meelgaara guriga ka taga; uurka; dhalashada canug
  - Cinwaanka
  - Kabitaanka kharashka/kirada guriga
  - Kharashyada tamarta (biyaha, korontada iyo kuleylka)
  - Dacwad xaraysashada
  - Haynta waalidka maqan ama booqashooyinka
  - Xukunka dembi culus ee maandooriyaha
  - Guurka, kala tagga ama dalaaqda
  - Iska xaadirinta dugsiga.

Haddii aad wax su'aala ah ka qabto ama aadan hubin waxa aad soo sheegi lahayd, hawlwadeenkaaga la xariir. Haddii aad hawlwadeenkaaga heli weydo, hawlwadeenka farrin u reeb si uu dib kuugu soo waco.

- Hay'adda, dawladda gobolka ama hay'ad federaal ay baarayaan macluumad kasta ee aad bixisay. Si aannu macluumaadka qaarkood ku helno waa in aannu oggolaashahaga saxiixan helno. Haddii aadan hay'adda oggolaan in ay macluumaadka xaqiijiso, waxaa dhici karta in aad caawimaadda heli waydo.
- Haddii ay dhacdo in aad na siisay macluumaad aad adiga ogtahay in uusan sax ahayn ama aannu helo macluumaad aadan soo sheegin, waxa aannu kugu qaadi doonnaa baaritaanka been abuur.
- Gobolka, ama hay'adda tayada munaasibka federaalka (federal quality control) si qori tuur ah ayay kiiskaaga dib ugu eegid ku sameynayaan. Waxa ay dib ugu eeggi doonaan bayaannada aad foomka ku qortay. Waxa ay dib u eegi doonaan haddii aannu si saxan ugu cabbirnay waxa aad u qalantay. Hay'adda gobolka waxa ay macluumaadka ka eegi kartaa ilo kale. Gobolka ama hay'adda tayada munaasibka federaalka waxa ay kuu sheegi doonaan waxa quseeya xiriir kasta oo ay ayaga ku talagjiraan in ay sameeyaan. Haddii aad la shaqayn weydo, nacfiyada ayaa dhici karta in lagaa joojiyo.

Waajibaadyada wada-shaqaynta

Haddii ay hay'addu ku oggolaato SNAP, MFIP in aad hesho ama DWP, waa shardi in aad la shaqeyso adeegyada shaqada, waa haddii aan lagaa masaabixin. Waa in aad soo diyaarsato iyo saxiixdo qorshehaaga shaqo ama ajirgaaga DWP waa laguu diidi doonaa.

- Si aad ku heshid nacfiyada lacagta caddaanka ee qoyska waa shardi in aad la shaqayso adkaynta masruufka caruurta ee caaruurtada oo idil ee xubnaha qoyskaaga ah. Waxa aad xaq u leedahay in aad sheegto "sabab jirta" haddii aadan la shaqaynayn adkaynta masruufka caruurta. Waa shardi in aad masruufka caruurtaada ugu qoondeyso Gobolka Minnesota caruurta u qalma oo idil.

Haddii aadan la shaqayn ama masruufka caruurtaada u qoondeyn, nacfiyada waa lagu diidi doonaa am lagaa joojin doonaaa.

- Kaddib marka ay hay'aadu oggolaato MFIP ama DWPgaaga haddii aad si toosa masruufka uga heleyso waalidka maqan, waa shardi in aad hawlwadeenkaaga u sheegtid. Waa shardi in aad la shaqeyso hay'adda masruufka caruurta tallaabada dacwad kasta ee aad adiga dhinac saddexaad ka xaraysatay sababo bixinta kharashyada caafiimadka la xariira, waa haddii aadan sheegan iyo lagu oggolaan sabab jirta.
- Lacagta caddaanka ah ee ku jirta Kaarka Xawlilaadda Nacfiga (Electronic Benefit Transfer - EBT) waxaa loogu talagalay in ay dadka ku caawiyso si ay baahidooda ku qanciso. Baahiyadaan aasaaska waxaa ka mid ah cuntada, hoyga, dharka, tamarka iyo gaadiidka. Lacagtaan waxa dadka la siinaya illaa inta ay isku filnaan ka gaari karaan.
- Waa sharcidarro in isticmaalaha kaarka EBT uu sigaarka/tubaakada ku iibsado ama uu iskudayo in uu ku iibsado ama kaarka EBT uu qamriga ku iibsado. Haddii ay sidaa sameeyaan, waa qiyaamo waxaana laga saari doonaa barnaamijka. Kaarka EBT ha ku isticmaalin rugaha lagu qamaaro.
- Kaarka nacfyada lacagta caddaanka ee MFIP/DWP quseeya laguma isticmaali karo ama looma adeegsan karo dukaamada khamriga, rugaha qamaarka, ama goob lagu iibiyo sheeyo ay dadka waaweyn ku raaxaystaan sida jilayaasha ayaga aan dhar qabin ay dadka ku maawelinayaan.
- Mar kasta ee aad kaarkaga EBT ugu istimalanayso lacag caddaan ah wax ugu iibsato ama aad jeeggaga ku saxiixayso, waxa aad ku caddaynaysa in aad hay'adda u sheegtay wax kasta ee isbaddallada ku taxluqa xaaladdaada oo nacfiyadaada saamayn ku yeelan kara.
- Mar kasta ee kaarkaaga EBT la isticmaalo waxa aan u qaadanaynaa in aad heshay nacfiyada lacagta caddaanka ah ama SNAP, marka laga reebo in aad hay'adda u soo sheegtay in kaarkaaga uu lumay ama la xaday.

Xuquuqdaada

- Xaqaaga aad u leedahay asturnaanta. Macluumaadkaaga gaarka kuu ah waxaa ilaaliya sharciyada gobolka iyo kuwa federaalka. Hawlwadeenkaaga ayaa ku siin doona warqadda maclumaadka "Ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan" ("Notice of Privacy Practices") (DHS-3979) ee xuquuqdaada kuu sharaxaysa.
- Waxa aad xaq u leedahay in aad mar kasta dib ugu dalbatid haddii nacfiyadaada la joojiyay.
- Waxa aad xaq u leedahay in aad oogatid sababta, haddii aanan shaqada arjigaaga dhaqsa wax ka qaban.
  - 30 cisho lacagta caddaanka ah iyo SNAP
  - 60 ciso lacagta caddaanka ee naafonimada quseeya.
- Waxa aad xaq u leedahay in aad ogaatid shuruudaha barnaamijka aad dalbanaysid quseeya iyo in aannu annaga kuu sheegno waxa quseeya sida aannu nacfiyadaada ku cabbirnay.
- Waxa aad xaq u leedahay in aad dooratid meesha iyo cidda aad la noolaaneysid.
- In aad adeegyada sharciga lacagla'aan ku heshid. Hawlwadeenkaaga kala soo xariir kartid macluumaadka adeegyada sharciga lacagla'aanta quseeya.

Racfaanka xuquuqda

"Racfaanku" waa nidaam sharci ah taaso garsooraha adeegyada aadanaha uu dib ugu eegayo go'aamada ay hay'addu gaartay. Racfaan ayaad ka qaadan kartaa go'aanka haddii aad qabto in hay'addu codsigaaga caawimaadda aysan waxba ka qaban, ama aadan ku raacsanayn go'aanka la gaaray. Adiga ayaa dhagaysiga ismeteli kara, ama qof kale (qareen, qarabo, saaxiib ama qof kale) ayaa ku meteli kara. **Waxa xaaladda degdegga ah quseeya**, marka kiiskaaga uu yahay mid degdeg ah una baahantahay in racfaanka go'aan laga gaaro, waxa aad codsan kartaa dhagaysiga degdegga ah adiga oo hay'adda ama Xafiiska Racfaanka Gobolka (State Appeals Office) waca. **Waxa barnaamijyada lacagta caddanka quseeya**, waxa aad racfaank ka qaadan kartaa muddo 30 cisho gudahood ee laga soo wareego taariikhda aad ogaysiiska heshay adiga oo warqad u dira kuna sheega in aadan go'aanka la gaaray raalli ka ahayn. Waxa aad warqaddaan u diri kartaa hay'adda, ama si toos ah Xafiiska Racfaanka Gobolka u geeya. Haddii aad "sabab jirta" ku muujiso in aadan racfaan ka xaraysan kaalmada lacagta caddanka ah muddo 30 cisho gudahood, hay'addu waxa ay aqbali doontaa racfaan illaa iyo 90 cisho laga bilaabo taariikhda ogaysiiska lagu soo diray. "Sabab jirta" waa marka sabab fiican aad ka haysato in aadan racfaan ku xaraysan xilligaan. Garsooraha adeegyada aadanaha waxa u go'aan ka gaari doonaa haddii sababtaada ay tahay "sabab jirta". Waxa aad codsan kartaa in aad si aan rasmi ahayn la kulantid shaqaale hay'adda ka socda si mushikiladda lagu xalliyo, balse kulankaan dib uma uu dhigayo mana baddalayo xaqaaqaaga aad racfaanka u leedahay. **Waxa SNAP quseeya**, waxa aad racfaan ka xaraysan kartaa muddo 90 cisho gudahood si qoraal ah ama waca hay'adda ama Xafiiska Racfaanka Gobolka.

U Qor:
(Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota)
(Xafiiska Racfaanka)
Minnesota Department of Human Services
Appeals Office
P.O. Box 64941
St. Paul, MN 55164-0941

Wac:
Magaalada iyo nawaaxigeeda: 651-431-3600 (Codka)
Gobolka: 1-800-657-3510
TTY: 1-800-627-3529
Fakis: 651-431-7523

Haddii aad doonayso inaad nacfigaaga sii qaadato illaa iyo inta dhagaysiga la sugayo, waa in aad 10 cisho gudahood racfaan ka xaraysato laga bilaabo taariikhda ay hay'addu warqaddeeda ogaysiiska tallaabada ama kahor inta tallabada la soo jeediyay lagu dhaqaaqin si nacfiga meeshiisa laga sii wado. Barnaamijyada badankood, haddii aad racfaan xaraysato waqtiga uu ku beegna, waxa aad nacfigaaga heli doontaa illaa iyo inta uu garsooraaha go'aan ka gaarayo racfaanka. Haddii aad racfaankaga ku guuldarraysato, waxaa shardi kugu in aad dib u bixisid nacfiga aad qaadanaysay inta racfaanka lagu jiray. Waxa aad hay'addaada weydiin kartaa in ay nacfiyda joojiso illaa iyo inta go'aanka laga gaarayo. Haddii aad nacfigaaga joojiso kaddibna aad racfaanka ku guuleysatid, waxa dib lagugu soo celinaya nacfiyada ay ahayd in aad qaadatid. Hawlwadeenka hay'addaada weydiiso in uu kuu sharaxdo sida dhicitaanka racfaankaaga uu u saamayn karo kaalmada hadda jirta iyo midda mustaqbalka.

Takooridda sharciga ayay jabinaysaa.

Xaq ayaad u leedahay inaad dacwad xaraysatid haddii aad aaminsantahay in hay'dda adeegyada aadanaha si takoorid leh kugula dhqmeen. Waxaad la xariiri kartaa hay'adaha soo socda midkood si aad uga xaraysatid dacwadda xuquuqda madaniga.

Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota, Fursadaha loo Simanyahay iyo Helitaanka loo Simanyahay (Minnesota Department of Human Services, Equal Opportunity and Access Division), takoorid kama oggola dhammaan barnaamijyadeeda sababo la xariira asalka, midabka, asal qarameed, caqiidada, diinta, jinsi doorashada, xaaladda gargaarka guud, da'da, naafonimada, ama jinsiga. Si toos ah kala soo xariir Fursadaha loo Simanyahay iyo Helitaanka loo Simanyahay:

(Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota)
(Fursadaha loo Simanyahay iyo Helitaanka loo Simanyahay)
Minnesota Department of Human Services
Equal Opportunity and Access Division
P.O. Box 64997
St. Paul, MN 55164-0997
651-431-3040 (cod) ama
isticmaal qadka isgaarsiinta aad doorbiddo

Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota (Minnesota Department of Human Rights) ma oggola takorid ka dhaca barnaamijyada adeegyada guud sababo la xariira asalka, midabka, caqiidada, diinta, asal qarameed, naafonimada, jinsiga, jinsi doorashada, ama xaaladda gargaarka guud. Si toos ah ula soo xariir Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota:

(Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota)
Minnesota Department of Human Rights
Freeman Building, 625 North Robert Street
St. Paul, MN 55155
651-539-1100 (cod)
1-800-657-3704 (telefoon lacagla'aan)
711 ama 1-800-627-3529 (Khadka Laliska MN [MN Relay])

Waaxda Caafimaadka iyo Adeega Aadanaha ee Maraykanka Xafiiska Xuquuqyada Madaniga (U.S. Department of Health and Human Services' Office for Civil Rights) ma oggola takoorid ka dhaca banrmaamijyadeeda sababo la xariira asalka, midabka, asal qarameed, da'da, naafonimada iyo mararka qaarkood diinta iyo jinsiga ku salaysan. Si toos ah ula soo xariir hay'adda federaalka:

(Waaxda Caafimaadka iyo Adeega Aadanaha ee Maraykanka)
(Xafiiska Xuquuqda Madaniga, Deegaanka V)
U.S. Department of Health and Human Services
Office for Civil Rights, Region V
233 North Michigan Avenue, Suite 240
Chicago, IL 60601
312-886-2359 (cod)
1-800-368-1019 (telefoon lacagla'aan)
1-800-537-7697 (TTY)

Waaxda Beeraha ee Maraykanka (U.S. Department of Agriculture) ma oggola takoorid lagula kaco macaamiisheeda, shaqaalaha, iyo codsadayaasha shaqada sababo asalka, midabka, asal qarameed, da'da, naafonimada, jinsiga, jinsi aqoonsashada, diinta, fikradda siyaasadeed, xaaladda guurka, xaaladda qoyseed ama waalidnimo, jinsi doorashada, ama maclumaad ilaalsan ee isirwadaaga ee ka dhaca shaqada ama meelkasta ee barnaamijyada ama hawlaha ay Waaxda wadda ama maalgalisay. (Waxyaabaha ku salaysan waxa aan la oggolayn oo idil ma saamaynayaan hawlaha barnaamjyda iyo/ama shaqada.)

Haddii aad doonaysid in aad dacwad barnaamijka xuquuqda madanida ka xaraysatid ee taakoorid ah, waxa aad buuxisa Foomka Daacwadda Takooridda ee Barnaamijka USDA (USDA Program Discrimination Complaint Form), oo laga helayo internetka laga galayo http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, amaba xafiis kasta ee USDA, ama wac 1-866-632-9992 si aad foomka ku codsatid. Waxaa kaloo dhici karta in aad qoratid warqad ay ku jiraan macluumaadka idil ee foomka lagu weydiiyay oo idil. Foomka ama warqadda noogu soo dir xagga boostada ee ah:

(Waaxda Beeraha ee Maraykanka)
(Maamulaha, Xafiiska Xukumidda)
U.S. Department of Agriculture
Director, Office of Adjudication
1400 Independence Avenue, S.W.
Washington, D.C. 20250-9410
202-690-7442 (fakiska)
ama iimayl ugu dir program.intake@usda.gov

Shakhsiyaadka dheegaha beelay, ama dhega culus ama ay naafonimada hadalka haysato waxa ay la xariir karaan USDA ayadoo loo marayo Adeegyada Laliska Federaalka (Federal Relay Service) oo laga helo 1-800-877-8339; ama 1-800-845-6136 (Isbaanish).

Maclumaad kasta ee kale ee dheeraad ee arrimaha Supplemental Nutrition Assistance Program - SNAP (Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka) quseeya, shakhsiyaadku waa in ay mikood la xariiraan Khadka Lambarka Deg-degga (USDA SNAP Hotline Number) ee 1-800-221-5689 laga wacayo, kaaso xitaa afka Isbaanishka leh, ama Macluumaadka Gobolka/Lambarka Deg-degga (State Information/Hotline Numbers) la waco (taabo liiska lambarrada deg-degga ee Gobolka quseeya); kuwaaxo internetka laga helano marka la galo http://www.fns.usda.gov/snap/contact_info/hotlines.htm

USDA waa bixiye iyo shaqaaleye leh fursadaha loo simanyahay.

CB2 (1-15)

Ogaysiiska ku taxluqa Qaabka Lagu Caddaynayo Nidaamka Dakhliga iyo U Qalmidda iyo Nidaamka Warbixinta Shaqada

Waa maxay Qaabka Lagu Caddaynayo Nidaamka Dakhliga iyo U Qalmidda (Income and Eligibility Verification System - IEVS)?

Dawladdu waxa ay leedahay qaab ay dakhliga ku ogaato. Waxaa la yiraahdaa "Qaabka Lagu Caddaynayo Dakhliga iyo u Qalmidda" (IEVS). Sharcigu waxa uu na siinaya fursad aannu dakhligaaga haydo kale kala xariirno. Waa in aannu eegno dakhliga dadka idil ee nacfiyada lacagta caddaanka ah codsanaya ama qaataba. Tan waxaa ka mid caruurtaada. Waxa aannu u bahaannahay lambarrada Social Security numbers (SSN) ee qof kasta ee caawimaadda doonaya. Haddii aadan SSN lahayn, waa in aad mid dalbatid. Ka dalbo ha'addaada adeegyada aadanaha. Waa in aad SSN oo idil aad hawlwadeenkaaga u gudbisid.

Waa maxay Nidaamka Ka Warbixinta Shaqada?

Shaqaaleeyeyaasha Minnesota waa in ay na soo wargeliyaan marka ay shaqaale qoranayaan. Macluumaadkaan waxaa isticmaalaya Child Support Program (Barnaamijka Masruufka Caruurta). Waxaa kale ee aan maclumaadkaan u isticmaalaynaa si aan ku ogaanno haddii shaqaalaha cusub la siinayo caawimada mid ka mid ah barnaamijyada ku qoran bogga koobaad ee arjigaan.

Maxay tahay xogta aannu heli doonno iyo sida aannu u isticmaali doonno?

Waxa aannu haydaha weydiin doonnaa xog ku taxluqda dakhligaaga, hantidaada iyo caymiska caafimaadka. Haddii ay dhacdo in aad noo sheegi weydo gebiahaamba waxa ku saabsan dakhligaaga ama hantidaada, dib ayaannu u xisaabinaynaa caawimaaddaada. Waxaa dhici karta in caawimaadda lagu siiyo hoos loo dhigo amaba la joojiyo. Haddii aad qaadanaysay caawimo aadan uqalmin in aad qaadato, waxa aannu maclumaadkaan u adeegsan doonnaa dacwadaha madaniga ama kuwa dembiga.

Sidee ayaannu u isticmaali doonnaa?

Haddii shaqaalaha uu caawimo ka helayo mid kasta ee ka mid ah bamaamiijyadaan, shaqalaha ogaysiis ayaa loo dirayaa. Haddii uu rukunka soo sheegin shaqada, hawlwadeenka ayaa rukunka la xariiri doono. Hawlwadeenka waxa uu rukunka weydiin doona caddayn ku taxluqda shaqada. Rukunka waxaa laga rabaa in uu hay'adda u fasaxdo in ay shaqaaleyaha ka wareysato xogta aad soo gudbisay. Haddii uu rukunka nagu caawin waayo baaritaanka maclumaadka, waxa ay waayi doonaan nacfiga.

Hay'adaha aannu macluumaadka ka qaadaneyno

Waa in aannu xog wareysi la yeelanno hay'adahaan:

- Dawladda Maraykanka Maamulka Sooshal Sikuuradka (United States Social Security Administration - SSA) – Waxa annu xogta iskaa u shaqeysaada ka helaynaa dakkhliga ku soo gala, dakhliga hawlgebka, qofka ku dhaxlaya nacfigiisa, bixinta naafonimada, Sooshal Sikuuradka (Social Security - RSDI), Dakhliga Kabidda Bulshada (Supplemental Security Income - SSI).
- Hay'adda Canshuuraha Dalka Maraykanka (United States Internal Revenue Service - IRS) – Waxa aan heli karnaa xogta lacagta ku soo gasha balse aadan u shaqaysan (sida faa'iidada dulsaarka iyo faa'iidada maalgalinta).
- Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota (Minnesota Department of Employment and Economic Development - DEED) – Waxa aannu xogta lacagta saacadda iyo mushaarka iyo caddamaynaha ka heleynaa Caymiska Shaqo la'aanta.
- Xafiiska Adkaynta Masfruufka Caruurta ee Minnesota (Minnesota Office of Child Support Enforcement)
- Hay'adaha gobollada kale ee maamula:
  - Caymiska shaqo la'aanta
  - Kaalmo lacag caddaan ah
  - SNAP
  - Adkaynta masruufka caruurta ee jira
  - Lagacta dheeraadka ee gobolka uu ku bixininayo SSI.

Hay'adahaan waxa ay xaq u leeyihiin in macluumaad adiga kugu taxluqa ay annaga naga helaan. Waxaa shardi ku ah in ay maclumaadkaan u isticmaalaan barnaamijyada sida RSDI, adkaynta masruufka caaruurta, gargaarka lacag caddaan ah, SNAP, Caymiska Shaqo la'aanta, iyo SSI.

Waxa aannu kuu soo sheegi doonnaa haddii maclumaadka aan ka helnay hay'adaha kale aysan la mid ahayn macluumaadka aad adiga na siisay. Waxa aannu kuu sheegi doonnaa maacluumaadka aannu helnay, nooca dakhliga ama hantida, iyo inta ay la egtahay. Waxa aannu ku siin doonnaa 10 cisho aad si qoraal ah noogu soo jawaabtid si aad ku caddeyso haddii macluumaadkeenna uu yahay mid qalad ah.

Waxa aannu ku weydiin doonnaa in aad na tusto caddaynta dakhliga, hantida, ama caymiska caafimaadka aadan adiga kaa soo warbixin ama aannu annaga caddayn weynay. Waxaa lagaa rabaa in aad na siiso oggolaasho aannu ku caddaynayno macluumaadka ayadoo la barbardhigayo diiwaanka lagaa hayo. Waxa aannu kuu sheegi doonnaa waxa dhici doona haddii aadan noo sixiixin oggolaashada ama aad na caawin weydid.

Sharciga ayaa xaddidaya cidda la siinayo xogta adiga ku quseysa

Sharciga ayaa xaddidaya macluumaadka adiga kugu taxluqa ee aannu hay'adaha kale ka helayno iyo kuwa aannu siinayano. Qandaraasyada Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota lala gelayo iyo kuwa hay'adahaba sida adiga aya ku difaacayaan. Hayadahaa kaliya, gobolka, iyo hay'adda degmada ee aad wax ka dalbatay si aad nacfiayda ku heshid ayaa maclumaadka kugu taxluqa u isticmaali kara. Cidna ma ay heli karto macluumaadka adiga kugu taxluqa ayaadoon qoraal oggolaasha ah lagaa hayn.

Waajibkaaga in aad soo sheegto

Waa in aad dakhligaa iyo hantidaada oo idil soo sheegto:

- Haddii aad kaalmada lacagta caddaanka ah qaadatid, wixii isbaddallo ah ku soo sheego muddo 10 cisho gudadood ee isbaddlka dhacay, ku soo qor Foomka Warbixinta Qoyska (Household Report Form) (DHS-2120), foomka soo buxi kuna soo celi maalinka 8aad ee bisha.
- Haddii aad SNAP qaadatid, waa shardi in aad isbaddallada soo sheegto maalinka 10aad ee bisha xigta bisha uu isbaddalka dhacay. Tusaale, haddi isbaddalku dhacay Maarso, waa n aad isbaddalka soo sheegto muddo ku siman 10 Abriil.

Waxaa weli lagaa rabaa in aad dakahligaaga, hantida iyo macluumaadka kale kugu taxluqa ku soo sheegto foomanka dib u eegiidda ee aannu kuu soo direyno.

Waa shardi in ay hay'addu eegto dakhligaaga iyo hantida. IEVS waa hal waddo oo lagu caddayn karo inta ay dakhligaaga iyo hantidaada tahayh.

Maxaa dhacaya haddii caawimaad lagaa waayo?

Waa in aad nagu caawisid sida aan ku eegi lahayn dakhligaaga iyo hantidaada si aad kaalmada lacag caddaan ah iyo SNAP ku heshid. Haddii aad na caawini weydid, adiga iyo qoyskaaga caawimaad ma helaysaan.

Awoodda Sharciyeed

IEVS - 7 CFR, parts 271, 272, 273, 275; 42 CFR, parts 431, 435; 45 CFR, parts 205, 206, 233 Work Reporting (Warbixinta Shaqada) – Minn. Stat., section 256.998, subd.10.

ADA5 (12-12)

